Kumla kommun

Degmada Kumla

Magaca ardayga :
Lambarka (personnummer):

Lambarka aqoonsiga qaybta:

Waaxda tacliinta aan dhamaan

## Heshiiska amaahashada kombiyuuterada iyo taabiletka (surfplatta)

Heshiis ka dhexeeya arday, waalid iyo degmada Kumla.

### § 1 Bilow

Degmada Kumla waxaa ay ardayga siineysaa kombiyuuter uu iska leeyahay ama qalabka taabileetka yar yar ( surfplatta) , kaasoo uu isticmaalo ardaygu wakhtiga uu iskuulka ku sugan yahay. Saxiixitaanka heshiiskaan waxaa uu waalidku caddaynayaa in isaga waalid ahaan iyo ardaygu ay akhriyeen heshiiska iyo sharciyada kuwaasoo uu qeexaayo qodob sharciyeedka § 3.

Waalidku waxaa uu kolkaa balanqaadayaa inuu ka shaqeeyo in ardaygu u raaco sharciyada sida ay hoos ugu qoran yihiin. Waalidka iyo ardaygu waa iney ogaadaan in iskuulku xaq u leeyahay in la qaadan karo qalabkaan haddii sharciga la jebiyo. Heshiisku waxaa uu jiraa marka qalabku soo galo gacanta ardayga ilaa uu iskuulka dib ugu wareejinaayo.

### § 2 Keenitaan iyo meel-dhigis

Qalabka waxaa lasoo qaadan karaa kolkii waalidku heshiiska saxiixo. Iskuul kastaa isagaa go`aansanaaya qaabka iyo wakhtiga qalabka ardayga lagu wareejinaayo. Iskuulka ayaa go`aansanaaya siddii laga yeeli lahaa qalabkaan inta lagu jiro fasaxa iskuulka.

### § 3 Sharciyada isticmaalka qalabaka IT-ga iyo isku xirka kombiyuuterada

Nidaamka kombiyuuterada iyo qaabka ay isugu xiran yihiin ayaa ardayga waxaa ay siineysaa fursad uu ku helo barnaamijyo kala duwan oo lagu abuuri karo diiwaa iyo isku xir dhinaca internetka ah. Waa nidaam faaìido u leh shaqoyinka iskuulka ee ardaydu qabtaan ee ku wajahan dhinaca duruusta. Waxaana uu qalabkani ku siin karaa iskuxir iyo xiriir degdeg ah.

Inta lagu gudajiro wakhtiga uu ardaygu deynsaday qalabkaan waxaa waajib ku ah inuu si fiican oo masuuliyad leh u xanaaneeyo. Qalabkan waxaa iska leh iskuulka, waxaana loogu talogalay iney tacliinta fududeeyaan. Sidaa darteed waxaa waajib ah in ardaygu uu si wanaagsan uga taxadaro.Qalabka waa in lagu xanaaneeya khaanad qafil leh ama la dhigaa meel aad ka arki kartid.

Qalabkaan sida caadiga ah waxaa qalabka loo qaadan karaa guriga kolkii maalinta iskuulku dhamaado, balse waa in maalinta xigta lala soo noqdaa iyadoo uu beterigeedu buuxo.Markasta waa in qalabka la geliyaa boorso ama gal lagu xafido. Ardaygu waxaa uu

qaadayaa masuuliyada in aan qalabkan loo isticmaalin ujeedo kale oo ka duwan waxa uu sharcigu qeexaayo. Tusaale ahaan lama soo degsan karo hanti farshaxan ee uu qof kale leeyahay kuwaasoo loo fahmi karo kuwo dadka dhibaaya ama xadgudub loo arki karo

Si looga difaaco isticmaalaha waxii xadgudub ah, loona hubiyo isticmaalka qalabka iyo iskuxirka nidaamka kombiyuuterka:

- Ardaygu waxaa uu xaq u yeelanayaa nidaamka iyo barnaamijka kuwaasoo iskuulku ogolaansho u haysto.
- Qalabka iyo waxyaalaha la socda waa waxyaalihii uu ardaygu ku shaqeynaaya , waana inuu iskuulka usoo qaata.
- Qalabku waa qalab la xadi karo sidaa darteed waa in ardaygu ilaliyaa oo ku xanaaneeyaa meel la hubo.
- Ardayga ayaa masuul ka ah qalabkan, waana inaanu meel uga tegin iyagoo aan la ilaalin.Waa in ardaygu aad uga taxadaraa ardaygu.
- Magaca gaarka ah ee ardaygu isticmaalo iyo lambarka uu ku galo qalabkan waa kuwo qofku leeyahay , ardayga ayaana masuul ka ah in si sax loo isticmaalo. Waa muhiim in aan ardaygu aanu lambaradaas lagu galo kombiyuuterkka aanu cid kale siinin, waana in si sir ah loo ilaaliyaa. Haddii ardaygu warbixintaas uu qof kale deymiyo oo uu qofkaasi la yimaado wax aan sharci ahayn, hadhow masuuliyada waxii dhacay waxaa iska leh qofka warbixinta dhiibey. Haddii baraha bulshada lagu isticmaalo qalabkaan inta iskuulku socdo, sharciyadaa ayaa lagu fulinayaa.
- Wax kasta oo ardaygu uu ku sameeyo qaabkaan waa la keydiyaa waxaan ari kara waaxda isgaarsiinta ( qaybta IT). Haddii wax qalad ah lagu isticmaalona waa laga xirayaa ardayga kombiyuuterkiisa.
- Degmada Kumla , ma qaadeyso wax masuuliyad ah oo ku saabsan waxyaalaha uu ardaygu sameeyo kolka uu qalabkan isticmaalaayo.

  Waa mamnuuc in:
- La soo booqdo hoy dhinaca internetka ah, la sameeyo ama la haysto,macluumaad kasoo horjeeda sharciga sweden kaasoo ay dadka kale u dareemi karaan xadgudub, tusaale ahaan hoyga dadka jirkooda qaawiya ama cawradooda soo bandhiga ama kuwa argagixida faafiya.
- Inaad soo degsatid ama faafisid farshaxan ay dad kale iska leeyihiin, tusaale ahaan sawirada laga soo qaato hoyga Google iyadoon la hubin cidda iska leh xuquuqda sawirada.
- Ind dhiibto warbxintaada ama lambarka lagu galo kombiyuuterka.

Tallaabo la qaadayo

- Haddii shuruucdaas la jebiyo ardayga waa laga joojinayaa isticmaalka qalabkaan, waxaana joojineysa waaxda isgaarsiintaee IT- ga loo yaqaan.Maamulaha iskuulka ayaa kuusoo gudbinaaya sababta qalabka loo xiray.
- Ardayga iyo waalidkiisna kolkaas ka dib ayaa loo sheegayaa in laga xiray qalabkii kombiyuuterka iyo sababtu waxa ay tahay.

## § 4 Cilad, qalabka oo dhuma ama la xado

Ardaygu waxaa uu qalabkaan ka amaahday degmada Kumla.Sidaas darteed ardayga ayaa masuul ka ah in qalabka si wanaagsan loo dhaqaaleeyo, lagana taxadaro. Haddii ay ciladi ku timaado qalabka sida uu u shaqeeyo, waa in lasoo sheegaa si degmadu u dayactirto.

Haddii qalabka la xado inta iskuulka la joogo waxaa arrinka booliiska u sheegaaya iskuulka.Wakhtiyada kale waxaa masuuliyada iska leh waalidka oo booliiska la socodsiinaaya.

Kombiyuuter dhumay ama la xaday si deg deg ah ayaa iskuulka loogu sheegayaa si loo xanibo markiiba oo looga joojiyo in cid kale isticmaasho.

Haddii dhaawac ku dhaco qalabka si taxadar la`aan ah kolkaas ardayga ama waalidkiis ayaa ay waajib ku noqoneysaa inuu bixiyo kharashka.

### § 5 Xuquuqda lahaanshada

Kombiyuuterka / taabileetka (surfplatta) waxaa iska leh degmada Kumla.Ardayga ama waalidkiis ma sii amaahin karaan , rahmad ama qaab kalena uma dhiibi karaan, taasoo khatar gelin karta xuquuqda lahaanshaha ee degmada Kumla.

### § 6 Heshiiska oo qof kale lagu wareejiyo

Ardayga/waalidka qof kale kuma wareejin karaan qalabka, rahmadna uma dhiibi karaan xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa, taasoo ku sugan heshiiska.

### § 7 Heshiiska oo meesha ka baxa

Heshiiskani si toos ah ayuu u baaba`ayaa haddii

- Ardaygu uu ka tago ama ka baxo iskuulada degmada Kumla.ama
- Heshiis cusub la galo, tusaale ahan haddii qalab cusub la siiyo ardayga.

Iskuulku wuu baabi`in karaa heshiiska haddii arrimhaan soo socda ay dhacaan:
a) Haddii ardaygu jebiyo sharciyada ku sugan heshiiska
b) Haddii ardaygu tacliinta dib u dhigto
c) Haddii ardayga laga xiro ama mumnuuco tacliinta
d) Taxadar xumo dheeraad ah oo joogto ah
e) Haddii ardaygu jebiyo siyaasada iyo shuruucda iskuulku degsaday.

Degmada Kumla ayaa sida kale leh xuquuqda in heshiiskaan laga baxo , waa haddii uu ardaygu raaci waayo waxyaalaha la isku raacay ee ku sugan hesiiska.

Waalidka si toos ah ayuu uga bixi karaa oo u baabi`in karaa heshiiska isagoon wax sabab ah sheegin. Haddii waalidku heshiiska ka baxo waa in qaab qoraal ah loo soo gudbiyaa, qalabkana iskuulka lagu wareejiyaa. Markaas ardaygu qalabka waxaa uu isticmaali karaa inta uu iskuulka dhex joogo, uma qaadan doono guriga.

Markii uu heshiisku dhamaado ardayga iy waalidkiis ayaa masuul ka ah in qalabka dib iskuulka loogu soo celiyo.Masuuliyadaas waxaa leh adinka, ardayga iyo waalidka. Qalabku waa inuu ahaadaa sidii ardayga loogu dhiibey kolkii laga reebo iney yara duqoobeen oo la isticmaalay taasoo uu heshiis dukaaneedka ( granti) uu dabooli doono. Dhamaan waxii kale ee qalabka la socdey sida boorso oo kale waa lasoo celinayaa markii wakhtiga amaahshadu dhamaado.

### § 8 Adeeg iwm.

Iskuulku haddii loo baahdo waxaa uu xaq u leeyahay helo qalabka lagu siiyey si loogu shubo barnaamij cusub ama kuwii hore la cusboonaysiiyo, ama in la xanaaneeyo oo la hubiyo in wax walbaa fiican yihiin.

**§ 9 Saxiixitaan**

Heshiishka waxaa laga samaynayaa laba koobi si waalidka iyo ardaygu mid u qaataan , iskuulkuna uu tan kale u qato. Kolka aad saxiixdo waxaad caddeyneysaa inaad fahamtay oo aad ogolaatay waxyaalaha heshiiska ku qoran.

Aniga/anagu waan akhrinay heshiiska , waan kala doodnay ardayga, waxaanuna dhiibnay ogolaansho.Waxaan ogsoonahay ogolaanshahayagu inuu waafaqsan yahay heshiiska.

**Waalidka 1**

| | |
|---|---|
| Saxiix | |
| Magacoo qoraal ah | |
| Lambarka qofka ( personnummer) | |
| Ciwaanka guriga | |
| Taleefoonka | |
| Boostada dhinaca internetka ( e-post) | |
| Magaalada iyo taariikhda | |

**Waalidka 2**

| | |
|---|---|
| Saxiix | |
| Magacoo qoraal ah | |
| Lambarka qofka ( personnummer) | |
| Ciwaanka guriga | |
| Taleefoon | |
| Boostada dhinaca internetka ( e-post) | |
| Magaalada iyo taariikhda | |